

Ku saabsan adeegga Boliiska Metroboolitanka

Sanadku markuu ahaa 1829, waxaa Adeegga Boliiska Metroboolitanka (Metropolitan Police Service - MPS) asaasay Sir Robert Peel in 1829, waxayna boliiska u xilsaaran yihiin ilaalinta qaynuunka sharciga ee guud ahaan Greater London, ayna ku jirin Caasimadda London taasi oo mas'uuliyaddeeda ay saaran tahay Boliiska Caasimadda London (City of London Police).

Adeegga Boliiska Metroboolitanka, oo ah ciidanka ugu weyn waddanka United Kingdom, waxaa u shaqeeyaa 51,000 saraakiil iyo shaqaale ka badan. Waxayna ka shaqeeyaan ilaa 620 mayl oo wareeg ah, gobollo ka badan 32 ee ku yaal London, waxayna caawiyaayn bulsho tiradeedu kor u dhaaftay 7.2 milyuun.

Adeegga Boliiska Metroboolitanka waxaa hoggaamiye u ah Taliyaha Ciidanka Boliiska, kaasi oo loo yaqaano Guddoomiyaha 'Commissioner'. Taliyaha Ciidanka Boliiska wuxuu mas'uul ka yahay Waaxda Adeegga Boliiska Metroboolitanka. Taliyaha Ciidanka Boliiska ee hadda waa Bernard Hogan-Howe.

Boliiska Metroboolitanka waxaa kaloo caadi ahaan loo yaqaanaa 'Scotland Yard' taasi oo magaca ka soo qaadatay meesha uu ku yaallo ee ah New Scotland Yard oo ka tirsan Westminster, London.

La Xiriiridda Boliiska

Imaajensiga

Haddii ay kugu timaaddo arrin imaajensi waa in aad wacdaa 999. Waxaad adeeggaasi isticmaali kartaa goorta aad boliiska ugu baahatid si degdeg ah – haddii aad aragtay dembi markaasi dhacayo ama uu halis ku jiro qof kale.

Adeegga 999 wuxuu qabtaa telefoonada degdegga ah ee loo soo dirayo waaxda dab demiska, ambulaanska iyo iyo boliiska, sidaasi awgeedna waa in marka hore aad ogsoon tahay qaybta aad dooneysid, marka labaadna waa in aad sheegtaa luqadda aad ku hadashid. Adeegga imaajensiga waxay leeyihiin turjubaano joogto ah oo ku kala hadlo ilaa 170 luqadood kuwaasi oo u shaqqeya Leenka Luqadda (Language Line).

Arrimaha aan Imaajensiga ahayn

Haddii aad u baahan tahay in aad la xiriirtid boliiska illaase arrintaada **aysan ahayn** mid degdeg ah, waa in aad sameysaa mid ka mid ah arrimaha hoose

- Waxaad wacdaa nambarka telefoonka 101 ahna leen 24 saaco furan maalin kasta kuna saabsan arrimaha aan degdegga ahayn (non-emergency).
- Waxaad la xiriirtaa saldhigga boliiska ee xaafaddaada

Haddii arrinta aysan ahayn mid imaajensi ama degdeg ah waa in aad la xiriirtaa boliiska qaabilsan xaafadda uu dembiga ka dhacay – waxaadna kula xiriiri kartaa telefoon ama si toos ah ayaad u tegi kartaa saldhigga boliiska ee kuugu dhow ee u furan dadweynaha.

Sax halka ([here](#)) haddaad u baahan tahay akhbaarta saldigga boliiska ee kuugu dhow.

- Weydiimada guud

Haddaad noo soo direysid weydiin guud, fadlan waxaad warqad usoo qortaa:

General enquiries.

Metropolitan Police Service

New Scotland Yard

Broadway

London

SW1H 0BG

020 7230 1212 (leena 24 saaco furan))

Ka hortegidda dembiyada

Ka hortegidda Dembiyada (Crimestoppers) waa urur samafal ah oo madaxbannaan oona ka jira dhammaan waddanka UK oo loogu talagalay ka hortegidda dembiyada. Haddaad haysid akhbaar ku saabsan dembi dhacay oodna dooneysid in aad soo sheegtid adoon magacaada sheegin waxaad lacag la'aan ku soo wacdaa telefoonka 0800 555 111.

Soo Sheegidda Falalka Argagixisada

Haddii aad haysid wax akhbaar ah eek u saabsan falalka argagixisada waxaad si qarsoodi ah usoo wacdaa Leenka Ka Hortagga Falalka Argagixisada (Anti-Terrorist Hotline) 0800 789 321

Digniinta boombooyinka ama falalka kale ee argagixisada ee degdeg wax uga qabasho u baahan waxaad soo wacdaa 999.